Fikrado iyo cod dhibashadaadu waa muhiim

Hage ku saabsan heshiis wada shaqayn dad guryo Kownsal ku jira iyo Homes for Haringey.

Maadaama aad ka mid tahay dadka adeegyadeena isticmaala, waxaad samayn kartaa fikrad iyo talobixin muhiim ah oo adeegyada lagu hagaajinaayo. **Waxaan rabnaa inaad faalo naga siiso sidaad u aragto adeegyada aan bixino** isla markaasna taasi inay kuu saamaxdo inaad ka qaybqaadato go'aan ka gaarista meesha aad rabto inaad degto iyo adeegyo aad rabto inaad hesho. Markaad fikradahaaga na siiso, waan tixgelin doonaa fikradaha aad soo jeediso.

Si loo xaqiijiyo in fikradahaaga iyo wixii talo soo jeedin ah ee aad samayso si dhow ayaan ula shaqayn doonaa dad ku jira guryo Kownsal taasoo ujeedadu tahay soo saaris heshiis wada shaqayn dad ku jira guryo Kownsal iyo haya'ada Homes for Haringey.

Buugyarahan waa mid soo koobaaya qoraal heshiis wada shaqayn dad ku jira guryo Kownsal iyo haya'ada Homes for Haringey. Qoraalka Heshiiska oo buuxa waxuu sidoo kale ka kooban yahay istiraatijiyo ku saabsan wada shaqaynta dad ku jira guryo Kownsal. Qoraalkan oo tafaftiran waxaa laga heli karaa shabakada **www.homesforharingey.org** ama si aad u hesho nuqul qoraalka ka mid ah la soo hadal **020 8489 4463.**

Muxuu yahay heshiis wada shaqayn dad ku jira guryo Kownsal iyo haya'ada Homes for Haringey

Heshiiska wada shaqaynta dad ku jira guryo Kownsal iyo sida anaga iyo Haringey Council waxuu dhigaayaa nadaamka iyo sida aan idinla shaqayn doono dad guryo Kownsal ku jira iyo dad iibsaday guryo Kownsal, taasooo ujeedadu tahay siinta adeegyo guryo iyo in guryaha la gaarsiiyo heer macquul ahaan loogu noolaan karo.

Qoraalkani waa mid muhiim ah waxuuna xaqiijinaaya inaad:

- naga heshaan macluumaad qayaxan iyo mid daacad ah
- ogaataan sida aad uga qaybqaadan doontaan go'aan ka gaaris arimo guryaha la xiriira iyo fahmida faa'iidooyin iyo mas'uuliyado samaynta arimahan ku saabsan
- fikrado ka dhiibato go'aan ka gaarista arimo muhiim ah oo la xiriira arimo guryaha ku saabsan
- hesho taageero, taageero dhaqaale iyo tababaro ka yimaada anaga ama Haringey Council taasoo lagu xaqiijinaayo inaad fikrado ka dhiibato arimaha la xiriira hawlaha adeegyada guryaha.

Horumarka laga sameeyey adeeg guryo ka qaybgelin dad ku jira guryo Kownsal

Waxaan heshiiska wada shaqaynta ku magacownay Fikradaada waa loo baahan yahay sababtoo ah wixii fikrado aad dhiibato runtii waa muhiim in la helo. Dad farabadan ayaa nagala shaqeeyey sidii horumar fiican looga samayn lahaa meesha ay degan yihiin iyo hagaajinta adeegyada ay helaan. Tusaaale ahaan, qaar ka mid ah dadka ku jira guryo Kownsal ayaa gacan ka gaystay in la doorto shirkad qandaraas ku qaadata barnaamijka in guryo macquul ahaan loogu noolaado (Decent Homes programme). Sidoo kale waxay dib u eegis ku sameeyeen buugyaraheena dayactirka guryaha, isla markaasna waxay hubin ku sameeyeen in adeegyada aan bixino ay yihiin kuwo u qalma in lacag lagu bixiyo.

Sida aad fikradahaaga usoo gudbin karto

Arimo badan ayaan idin kala tashan doonaa ayna ku jirto heerarka adeegyada iyo xaaldaha guryaha Kownsalka (sida wax dayactirid) iyo qorsheyaal wax wayn ka badalid guryaha aad degan tihiin. Ka dib markaan wada tashi idinla samayno Go'aankeena ayaan kuu sheegi doonaa iyo sida talobixintiinu saamayn ugu yeelatay go'aamada aan gaarnay.

Waxaa jira qaabab kala gedisan oo aad noogu sheegi karto sidaad u aragtaan adeegyada aan bixino taasoo aad adigu qof ahaan noogu sheegi karto, ama in wixii fikrad ah la soo mariyo residents' association, ama mid ka mid ah xubnaha gudiga haya'adda Homes for Haringey. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg bogga 7aad.

Haddii aadan haysan waqti badan oo aad firaaqo tahay, waxaad akhrisan kartaa **macluumaadka** aan kuusoo dirno, sida Homes Zone, warsidehana aan usoo dirno dhammaan dadka ku jira guryo Kownsal.

Sidoo kale xoogaa waqti dheeri ah ayaad nagu siin kartaa wixii **talo iyo tusaale ah** tusaale ahan adigoo soo buuxiya foomka su'aalo waydiinta ee guri dayactir ama inaad noo soo dirto wixii talobixin ah.

Si aad fikrad wayn uga dhiibato arimo gaar ah oo ku saabsan adeegyada guryaha la xiriira, waxaad ka qaybqaadan kartaa **wada tashi**, tusaale ahaan soo buuxin foom sahan su'aalo waydiin ama shir ka qaybgalid.

Hadaad xiisaynayso inaad anaga, dad kale oo guryaha Kownsalka degan iyo Haringey Council nala shaqayso si loo fuliyo adeegyo guryo, waxaad awoodi kartaa **inaad adeeg fulinta ka qaybqaadato**. Tusaale ahaan, waxaad ka qaybgeli kartaa koox hawl gaar ah u xilsaaran ama gudi gaar ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg bogga 7aad.

Sidoo kale hadaad rabto inaad awood u hesho **hawlo go'aamo ka gaaris** waxaad noqon kartaa xubin la doortay ee ururka dad ku jira guryo Kownsal ama inaad hogaamiso urur la dhaho tenant management organisation.

Si gacan lagaaga siiyo inaad hawlahan ka qaybqaadato, waxaan bixinaa noocyo tababaro iyo taageero kala gedisan, ayna ku jirto ka bixin qarash ilmo hayn, iyo ka caawin qarash xafiis ay ku shaqeeyaan urur ka wakiil ah dadka ku jira guryaha Kownsalka. Si aad u ogaato qaabab aad fikrado uga dhiiban karto isla markaasna uga qaybqaadan karto adeegyada aan bixino iyo sida aan dadka u caawin karno, waxaad la soo xiriiri kartaa resident involvement team.

Waxaad naga filan karto

Waxaan leenahay heerar nadaamsan oo aan adeeg idinku qabano. Waxaana nadaamyadan ka mid ah:

- **Siin macluumaad aad u tayo fiican –** waxaan idin siin doonaa macluumaad aad haqabtira baahidiina iyo inaan gacan idinka siino inaad hawlaha adeegga guryaha kaga qaybqaadataan qaab adiga kugu haboon.
- **Yeelasho shirar natiijooyin kasoo baxaan –** ujeeadeenu waa in la xaqiijiyo in shirarka aan la yeelano dadka ku jira guryaha Kownsalka ay noqdaan kuwo wax kasoo baxaan, isla markaasna qof kasta fikradiisa ka dhiiban karo.
- **Samayn urur residents' groups-** waxaan xaqiijin doonaa in ururada ka wakiilka ah dad ku jira guryo Kownsal ay ku shaqeeyaan nadaam heer sare ah isla markaasna aan siino taageero iyo tababaro gacan ka siiya inay si fiican hawlahooda u gutaan.

Ma xafideynaa balanqaadkii aan samaynay?

Waxaan rabnaa inaan ku socono oo xafidno balanqaadkii aan ku samaynay heshiiska wada shaqaynta dad guryo ku jira guryo Kownsal isla markaasna aan hagaajino nadaamka aan rabno inaan ku wada shaqayno.

Arintan awgeed, waxaan dajinay nadaamyo shaqo natiijo ka gaaris aan anagu shaqo ku qabano kuwaasoo si joogto ah loogu samayn doono dib u eegis isla markaasna loola socon doono siduu u shaqaynaayo heshiiska wada shaqaynta iyo iskaashiga aan la samaynay dad ku jira guryo Kownsal. Hawlaha dib u eegista waxaa ka qaybgeli doonaa Haringey Council iyo dad ku jira guryo Kownsal waxaana la soo bandhigi doonaa qaabka aan shaqada u qabano iyo meelaha aan natiijo fiican ka gaarnay. Maadaama aan la socod ku samayn doono heshiiska wada shaqaynta dadka ku jira guryo Kownsal waxaan rajaynaynaa in xili hore ama isla markiiba la xaliyo wixii dhaliil ama dhibaatooyin ah ee dadku soo sheegtaan. Hase yeeshee, haddii aad u aragto in heshiiska wada shaqaynta dad guryo Kownsal ku jira iyo haya'dani uusan si fiican u shaqayn ama uusan sax ahayn, cabasho ayaad soo qoran kartaa. Wax kasta oo aan sixitaan ku samayn karno ayaan samayn doonaa.

Macluumaad dheeraad ah

Waxaan leenahay qaabab badan oo aad uga qaybqaadan karto hawlaha haya'adan. Waxaad dooran kartaa sida iyo marka aad rabto inaad hawl nagala qaybqaadato. Waxaan leenahay fursado qof kasta ku haboon, sidaasi darteed haddii aad hawlahan xiisaynayso, fadlan nala soo xiriir si aan u wada shaqayno.

Noqo xubin ka mid ah **Board member**
Kusoo biir koox ama gudi ka mid ah **gudi hoosaadka aan leenahay**. Waxaan leenahay todoba gudi hoosaad waxaana ka mid ah gudi dayactir, dhaqaale, hadal isgaarsiin, estate & tenancy management, leaseholders, supported housing, iyo tenant participation.
Noqo qof **u hadla ama dooda** estate-ka aad degan tahay
Noqo xubin ka mid ah ururka **residents' association**
Imow shirarka **residents' consultative forum**
Su'aalo waydii mid ka mid ah xubnaha gudigeena
Noqo kormeere **resident estate**
Ka qaybqaado kormeerista iyo u kuurgalida **Estate Inspection**
Imow shirarkeena **ururka dad ku jira guryo Kownsal**
Soo buuxi **foom su'aalo sahan waydiin**
Samee **cabasho**, **tahniyadeyn** ama **dhiibasho talobixin**
Akhri warsideheena dad guryo Kownsal ku jira ee **Homes Zone**

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ka qaybqaadasho kooxdeena resident involvement team telefoon **020 8489 4463**, (minicom **020 8489 3718**) ama soo dir email **resident.involvement@homesforharingey.org**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan heshiiska wada shaqaynta dad ku jira guryo Kownsal iyo haya'ada Homes for Haringey soo booqo bogga internet-ka website **www.homesforharingey.org**